



Wakhtiga u oggolow in uu carruurta dhaqdhaqaaqijiyo

Waxaan u haysannay in ilmaha yar uu markasta dhaqdhaqaaqayo. Dhab ahaan 80 % carruurta ayaa sameeya dhaqdhaqaaq aad u yar. Dhibaatan waxaa lagu xallinayaa xulashooyin maalinle ah. Adiga ayaa cunuggaada u ah dhaqdhaqaaqijiyaha ugu fiican uguna muuhimsan.

helsinkiliikkuu.fi

Helsinki

Dhaqdhaqaaqa carruurta yaryar aad ayuu u yaryahay

Cunugga yar wuxuu dunida ku hareereysan ku bartaa dheel iyo dhaqdhaqaaq. Cunuggu wuxuu haahaabtaa, fuulaa islamarkaasna iska tuurtuuraan meel kasta. Sawir maskaxeedka dadka waaweyn waa in cunugga uu mar walba dhaqdhaqaaqo. Dhab ahaan boqolkiiba 80 carruurta ayaa sameeya dhaqdhaqaaq aad u yar. Dhaqdhaqaaq la'aantu kama dhalato in carruurta aysan sameyn hiwaayad la hago- sameynta hiwaayaduhu waa mid ku jirta wakhtigi ay ugu badneyd. Dhibaataada aasaasku waa in dhaqdhaqaaqi dabiiciga ahaa uu ka suulay nololmaalmeedkeena. Xittaa dadka sida joogtada hiwaayadda u sameeya uma dhaqdhaqaaqaan si ku filan, sababtoo ah inta badan nololmeedku waa mid gebi ahaanba meel fadhi ah. Magaalada Helsinki waxay dhaqdhaqaaq la'aanta wax uga qabanaysaa 60 waxqabad oo la taaban karo.

Waxaan soo uruurinay si qoyskaadu u isticmaalo agabka halkan la socda, kaas oo kaa caawin doona:

Aqoonsashada dhibaataada ah,

in carruurta yaryar badankood ay dhaqdhaqaaq yar sameeyaan

Cinwaanka

helsinkiikkuu.fi

ayaad qoyskaada uga heleysaa waxqabad wanaagsan, fiican islamarkaasna qiimo ahaan jaban



Xusuusato,

in aad tahay dhadhaqaaqiyaha ugu fiican cunuggaada. Ammaan, dhiirrigeli una suurrageeli!



Dareemidda,

in dhaqdhaqaaqu uu cunuggu siinayo hurdo tii hore ka fiican iyo in uu sidi hore ka caafimaad iyo farxad badan yahay

Fahmidda,

in muhiimaddu ay tahay in dhaqdhaqaaqa loo sameeyo si caadi ah maalin kasta



Fahmidda,


waxa dhabta ah ee loola jeedo dhaqdhaqaaqa cunugga ku filan



Ma ogtahay in u barashada dhaqdhaqaaqu ay ku billaabato saddex sano jirka?

Dhaqdhaqaaqu waa hadiyadda ugu fiican ee cunugga la siiyo

Miyaad dareentay in cunuggaa uu si fiican uu seexanayo bannaanka u bixinta kaddib? Booqashada Ka Xanaajisadu miyeey yaraadeen, haddii uu qoysku dalxiis gaaban ku tegay kaynta i diin dhow? Muhiimadda uu dhaqdhaqaaqu u leeyahay koritaanka iyo nololwanaagga cunugga waa mid aan muran ka jirin waxaana lagu caddeeyay baaritaanno badan. Cunug dhaqdhaqaaqa waa cunug faraxsan.



Qofka weyn ayaa cunuggu u ah tusaale iyo u suurtageliya dhaqdhaqaaqa ee ugu muhiimsan.

Saddex saacadood oo dhadhaqaaq ah maalin kasta – sidan ayaan sameynaynaa

Cunuggu 8 sano kayar waa in uu dhaqdhaqaaqa maalin kasta 3 saacadood. Dad badan ayaa ka fekeraya sida ay arrintani u suurragalaysa? Dhaqdhaqaaqa ku filan ee cunugga waxaan ku xaqiijin karnaa oo kaliya in la beddelo hababka loo fekeriyo oo qayb ahaan khalad ah. Hababka khaladka ah ee loo fekeriyo oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa carruurta:

” Cunuggaygu wuxuu tagaa todobaadki 2 jeer jimicsi la hago. Xaqiiqatan waa ay ku filantahay.

Jimicsiga la hago waa muhiim waxayna cunugga u suurragalaysaa barashada xirfado badan iyo waxqabad wanaagsan oo lagu sameynayo bey'ad bulsho oo ammaan ah. Si kastaba ha ahaatee jimicsiga la hago ma ahan mid u beddelaya muhiimadda dhaqdhaqaaqa iskiis ah. Cunuggu wuxuu maalin kasta u baahan yahay dhaqdhaqaaq noocyo badan.

” Hawl-maalmeedyada, u socoshada xannaano-maalmeedka ama dheeshu ma ahan jimicsi sax ah. Laguma dhididayo xittaa

Dhaqdhaqaaqa ku filan loolama jeedo saddex saacadood oo isboorti ah, ee waxaa loo jeedaa dhaqdhaqaaq fudud oo labo saacadood ah iyo majabaxsi firfircoon oo ay la socoto saacad uu jirku si xawli ah u dhaqdhaqaaqo. Dhammaan tallaabooyinka, dhaqdhaqaaqyada xoogga ah iyo dheesha dhaqdhaqaaqa leh waa lagu xisaabinayaa waana muhiim. Dhaqdhaqaaqu markasta ama baahna in loo qabanqaabiyo wakhti gaar ah, qalab ama meel loo qaado. Soo indha-indhaynta agagaarka, ku mashaquulsanaanta jardiinada ciyaarta, dheelista, ciyaaraha ardaaga ama xannaano-maalmeedka oo baaskiil lagu aado ayaa jimicsiga kordhinaya. Fadhiga iyo meel iska joogista cunugga oo la yareeyo oo kaliya ayaa caafimaadka iyo koritaanka cunugga u wanaagsan.

” Nololmaalmeedka goyskeennu waa mid mashquul badan, jimicsi wakhti uma hayno.

Nolosha nololmaalmeedku waa mid hadda ah-wakhtigu wuu imaanayaa waana baxayaa. Ma ka gaarnaa xannaano-maalmeedka, dharku roobka miyeeyku qoyayaan, sidee ayaa cunugga looga ilaaliyaa dhiigrooryada ama sidee wakhti loogu helaa shaqada guriga? Cunugga oo la fariisiyo baabuur, gaariga carruurta lagu qaado ama telefoonku waxay nololmaalmeedka u keenaan nafis wakhti gaaban ah oo aan laga maarmin. Si kastaba ha ahaatee arrintu dhinac kale oo la eego ayeey leedahay Haddii doorashooyinka nololmaalmeedku ay si gaar ah u xaddidaan dhaqdhaqaaqa, waxay ku soo noqonaysaa caafimaadqabka cunugga muddo 5–10 sannadood ah. Looma baahna in dhaqdhaqaaqu uu noqdo dhibaato dheeraad ah, ee waa in uu fududeeyaa nololmaalmeedka. Cunugga dhaqdhaqaaqaa waa hurdo fiican yahay, waa mid niyadsan oo faraxsan.

” Cunuggaygu markasta waxboo qabtaa. Xaqiiqatan in ku filan wuu dhaqdhaqaaqaa.

Dhaqdhaqaaqa waxaa u dhexeeya farqiyo waaweyn oo shakhsi ah. Macluumaadka cilmibaaris la hubiyay ayaa tilmaamaya, in carruurta yaryar aysan u dhaqdhaqaaq badneyn sida aan u maleyno. Nololmaalmeedku wuu isbeddelay. Carruurta waxay wakhti aad u badan dhex fadhayaan baabuur, qalabka casriga ah, xannaano-maalmeedka ama gaariyada. Caddadda dhaqdhaqaaqa xawliga ah ayaa si gaar ah gebi ahaanba carruurta ka maqan maalinta.



**1 saac oo
dhaqdhaqaaq
xowli ah**



**2 saac oo
lugabaxsi
firfircoon
ah iyo
dhaqdhaqaaq
fudud**



**dhaqdhaqaaq
noocyo badan oo 3
saddex saacadood
ah maalin
kasta**

Hal saac oo dhaqdhaqaaq xowli ah maalin kasta:

- Waxaan aadnaa jardiinada ciyaarta, halkaas oo lagu ordi karo, la fuuli karo carruur kalana si xawli ah loogula ciyaari karo.
- Waxaan aadnaa hoolka dabaasha aa kan iskii'inka.
- Guriga ayaan boos uga banneeyay dheesha xawliga ah ee cunugga. Cunuggu wuxuu ku ordi karaa kuna mashquuli karaa guri dhexdiisa.
- Waxaan baaskiil ku wadnaa dhulka buuraha ah.
- Qoyska deriskeena ah ayaan ardaaga kula ciyaaranaa is-raacdaysi.
- Barafka bannaanka yaal ayaan ku ciyaaranaa kabaha sakiintana kula tاراaxnaa.
- Carruurta waxaan geeyaa hiwaayad la hago.

2 saac oo lugabaxsi firfircoon ah iyo dhaqdhaqaaq fudud:

- Baaskiil ama socod ayaan xannaano-maalmeedka ku aadnaa.
- Wiishka beddelkiisa jaranjarada ayaan raacdaan.
- Safarka dukaanka waxaan ku aadnaa socod ama baaskiil.
- Dalxiis gaaban ayaan ku aadnaa kaynta noo dhow, jardiinada ama jidka yar ee bey'adda.
- Wadajir ayaan bannaanka ugu wadnaa eyga qoyska.
- Waxaan ka qaybqaadanayaan goobta ardaaga guriga qoyskuna wadajir ayuu shaqada ardaaga u sameeyaa.
- Marka aan telefshinka daawanayno waxaa inoo joogto ah dheelidir celinta iyo qaalmarrogadka ama akrobaatka.
- Baska waxaan uga degnaa hal maxaddo kahor.
- Dalxiis gaaban ayaa aadnaa dhammaadka todobaadka.

TILMAAMAHAN AYAAD BILLOWGA HORE KU BILLAABAYSAA:

- Hababka dhaqdhaqaaq ee kor ku qoran adiga iyo qoyskaagu ka doorta 1–2 fal oo la taaban karo. Tilmaamo dheeraad ah waxaa laga helayaa ciwaanka [helsinki.fi](https://www.helsinki.fi)
- dhiga hiigsiga dhaqdhaqaaqa meel muuqata oo gurigiina ku taal. Todobaad kaddib ayaad go'aansan kartaan, in tijaabadu ay joogto idiin noqonayso iyo in aad qaabab cusub hindsiyaasaan. Waa hubaan in aad helayso hab aad ku dhaqdhaqaaqdo.
- Fal kasta wuxuu istaahilaa in la ammaano. Wax dhibaato ah ma laha, haddii aadan mararka qaar awoodin ama saddexda saac ay u muuqato wax aan suurragal aheyn. Waxaa wanaagsan in tallaabo yar lagu billaabo.

Halkee laga ogaanayaa, in cunuggaadu uu dhaqdhaqaaq ku filan sameeyo?

Carruurnimada ayaa nolasha lagu qoraa. Aasaaska dhadhaqaaqa waxaa lagu abuuraa 3 sano jirka. Caadooyinka la bartay waxa jireen nolasha oo dhan. Dadka oo dhan isuma arkaan in ay isboorti yihiin. Sidaas oo ay tahay qof kasta oo innaga mid ah hab isaga ku habboon ayuu u dhaqdhaqaaqi karaa. Dhaqdhaqaaqa maalinlaha ah wuxuu cunuggu u leeyahay muhiimad lamid ah tan hurda iyo cuntada nafaqada leh. Cunuggu wuxuu u dhaqdhaqaaqay si ku filan, marka uu leeyahay tamar uu wax ku sameeyo, si fiican ayuu cuntada u cunaa xilliyada cuntada si fiicana wuu u jiidtaa habeenki kaddib marka uu maalin si fiican u mashquulo. Cunug dhaqdhaqaaqa waa cunug faraxsan.

”**Cunug dhaqdhaqaaqa waa cunug faraxsan.**

Muhiimaddu waa in dhaqdhaqaaqa laga dhigo mid maalin kasta jooqto ah.

Dhaqdaqayada oo dhan waxaad ka heleysaa hal linki

Ma ogtahay, in maalmaha shaqada ay jardiinooyinka ciyaarta ee Helsinki ka jirto waxqabad la hago? Miyaad maqashay Buuqa Jimicsiga, kaas oo qoyska oo dhan wadajir ugu dhaqdaqaaqi karaan? Miyaad heshay bey'adda Helsinki? Magaaladeenna waxaa ka buuxa fursado dhaqdaqaaq oo lacag la'aan ah ama qiimohoodu uu macquul yahay. Cinwaanka helsinki.fi waxaad ka heleysaa tan ka sokow macluumaadyo, tilmaamo iyo fursado badan oo dhinaca dhaqdaqaaqa ah, kuwaas oo nololmaalmeedka qayb ka ah.

” Looma baahna in dhaqdaqaaqu uu gaali noqdo.



Ka hel habkaada dhaqdaqaaqa cinwaanka helsinki.fi
Ku qaybi habkaada dhaqdaqaaqa hastagga [#HelsinkiLiikkuu](https://twitter.com/HelsinkiLiikkuu)

Helsinki waxay wax ka qabanaysaa dhaqdhaqaaq la'aanta

Helsinki waxay xoogga ku saaraysaa dhaqdhaqaaqa dadka magaalada deggan hab cusub oo taabanaya nololaha qof kasta. Waxqabadka waa la billaabay, sababtoo in badan oo innaga mid ah ayaa caafimaadkooda u sameeya dhaqdhaqaaq aad u yar wax badanna fadhiya. Waxaa socda ku dhowaad 60 waxqabad. Hadafkoodu waa, in dhaqdhaqaaqu uu qof kasta oo innaga mid ah u noqdo mid fudud oo soo jiidasho leh.

Barnaamijka dhaqdhaqaaqa waxaa loola jeedaa tusaale ahaan arrimahan soo socda:



Waxaan la shaqeynaa rugaha latalinta hooyada iyo dhallaanka, xannaano-maalmeedyada, jardiinooyinka ciyaarta, adeegyada jimicsiga iyo adeegga guriga ee qoysaska carruurta leh si loo **kordhiyo fursadaha jimicsiga**



Waxaan isticmaalaynaa **baasaboorka hiyaadda dijitaalka ah** ee loogu talagalay ardaydga dugsiga dhexe



Waxaan xaqiijinaynaa in dhammaan **waaxyaha barbaarin-horaadka** ee Helsinki ay ku soo biiraan barnaamijka **barbaarin-horaadka dhaqdhaqaaqa**



Waxaan ka dhisaynaa bartamaha magaalada shabakad waddo baaskiil ah oo 75 kilomitir ah iyo 3000 oo boosaska baaskiilka lagu tiiriyo ah ugu dambeyn 2021.



Waxaan tababaraynaa shaqaalaha barbaarin-horaadka iyo waxbarashada aasaasiga ah **si ay u horumariyaan hab-nololeedka dhaqdhaqaaqa leh**



Waxaan kordhinaynaa isticmaalka **baaskiillada magaalada** iyo **tiradooda**



Waxaan hagaajinaynaa xaaladaha jimicsi ee toban dugsii ardaagood innagoo isticmaalaynaa maalgelinta dheeraadka ah ee sannadka 2019–2020



Iyadoo la kaalmaysanayo ablikeeshinka jimicsiga biririfta iyo waxqabadka goobta shaqada ee Dhaqdhaqaaqada ayaan **horumarinaynaa dhaqdhaqaaqa inta maalinta shaqada lagu jiro**



Sannad kasta waxaan **horumarinta waxqabadka hiwaayadda** ee carruurta iyo dhallinyarada siinaa **900 000 €**



Waxaan heshiis dhaqdhaqaaq la sameynaynaa ugu yaraan 70 boqolkii macaamiisha guri ku haynta

Qofna kali ahaantiis ama hal tab kuma xalinayo dhaqdhaqaaq la'aanta. Dhaqdhaqaaqu waa hiigsi Helsinki oo dhan.